# Waa maxay Hydroceles (xiniyo barar) iyo Hernias (sheelada)?

Hydroceles iyo inguinal hernias waa cilado guud oo ka dhasha qaliinka oo dhici kara da' kasta. Hal calaamad oo lagu garto hernia waa marka ilmuhu buro ku yeesho gumaarka, ama ragga keliy, qooraha. Inguinal hernias waxay aad ugu badan yihiin raga. Cilada hernia waa marka maadooyinka caloosha laga dareemi karo gumaarka iyo qooraha. Ragga, xubnaha waxaa ku jiri kara xiidmayaasha. Dumarka, xubnaha waxaa ku jiri kara xiidmayaasha, marinka minka iyo ugxamaha dhiiga caadada. Cilada hydrocele dheecaan ayaa ku uruura qooraha aaga xiniyaha.

Waxaa jira marin u dhexeeya caloosha iyo gumaarka oo xiniyuhu soo maro markuu ka yimaado caloosha una socdo qooraha ragga marka la gaaro bartamaha uurka. Marinka ayaa caadiyan xirma kahor inta aan ilmuhu dhalan. Marka marinkaan uusan xirmin, waxaa ka dhallan kara hernia ama hydrocele. Cilada "wareegga hydrocele" waa marka dheecanka ka yimaada ubucda uu horey iyo gadaal u dhaafo qooraha. Tani waa sida inguinal hernia aan toos ahayn, taas oo ka dhigan in maadooyinka ku jira xiidmaha ay soo marayaan marinka. Marka laga eego dusha sare, kuwaan ayaa caadiyan iskumid u ah ilmaha. Dadka waawayn, hernia iyo hydrocele way kala duwan yihiin.

Hydrocele fudud waa mid ku badan xiliga dhalasha waana marka dheecaanku ku xanibmo qooraha laakiin marinku xiran yahay. Kuwaan ayaa caadiyan iskood u dawooba sanadka koobaad dhalashada kadib.

## Waa maxay calaamadaha Hydrocele/Hernia?

Marka hydrocele uu jiro, cuf buuran ama buro ayaa lagu arkaa gumaarka ama qooraha. Cilada guurguuraysa ee hydrocele ama hernia ayaa isbadeli doona xajmi ahaan, ayagoo waynaada marka ilmuhu oynaayo, ama ilmaha wayn, marka ilmuhu soconaayo. Burada ayaa noqon doona mid yar marka ilmuhu hurdo ama aamusan yahay. Cilada hydrocele ama hernia ayaan badanaa lahayn wa xanuun ah. Laakiin, qaarkood ilmaha dhashay ayaa dareema xanuun. Waxaa suurtagal ah in aad ogaato in ilmhaagu camal xun yahay, ooyaayo wax badan uuna kor u taagaayo lugihiisa. Mararka qaarkood waalidiinta ayaa ogaada in cilada guurguurta ee hydrocele ay barar badan tahay dhammaadka maalinta ilmaha socod baradka ah iyo ilmha yaryar.

Cilada hydrocele ee guurguurta ma keento wax waxyeello ah oo ku dhacda xiniyaha, laakiin way balaaran kartaa mustaqbalka ilaa ay noqoto hernia. Marka buro ku taalo gumaarka, taas ayaa ka dhignaan karta in maadooyinka caloosha sida xiidmaha ay ku soo dhaceen marinka. Marka haddii maadooyinka cuntada dib loogu celiyo caloosha (oo la yiraahdo hernia la celin karo), markaas xaaladu maahan mid degdeg ah. Hase yeeshee, haddii, maadooyinka calooshu ku dhagaan meesha oo aan dib loogu celin karin caloosha, waxaa la yiraahdaa hernia xaniban. Waa in degdeg loo daweeyaa. Haddii ilmahaagu bilaabo inuu matago, uu aagu aad u adkaado, midabka gumaarka ama xiniyuhu noqdo madoow iyo buluug, qandho ama shuban, cilada hernia ayaa laga yabaa inay xanibantay. Tan ayaa keeni karta xanibaada ama waxyeellada ku dhacda sahaydeeda dhiiga waxaana loo arkaa xaalad degdeg ah si loo daaweeyo.

Mararka qaarkood, waxaa jirta hernia labo jibaaran oo ay jiraan hernia ama hydrocele u kala guur-guuraaya labada gees. Way soo bixi karaan iskumar ama wakhtiyo kala duwan.

## Waa maxay Daawada Hydrocele/Hernia?

Cilada fudud ee Hydrocele, dhakhtarkaaga ayaa keliya ka eegi doona ilmaha wax isbadello ah. Haddii cilada Hydrocele ee guurguurta ama inguinal hernia ay jirto, ilmahaaga ayaa u baahan kara qaliin. Haddii ilmuhu uusan dareemayn xanuun cilada hernia ay tahay mid la celin karo, qaliinka ayaa la qorsheyn karaa taariikh la isku raacay asagoo ah qaliin ikhtiyaari ah (aan ahayn xaalad degdeg ah). Haddii cilada hernia aan dib loo celin karin ama ilmuhu xanuun dareemaayo, qaliinka ayaa u baahan in degdeg loo fuliyo ama ahaado qaliin xaalad degdeg ah.

Qaliinka ayaa lagu fuliyaa suuxdin guud. Ilmaha dhashay iyo socod baradka, ma dareemaan xanuun inta ay soo jeedaan. Ilmaha yaryar waxaa lagu seexshaa aariyo kabaabyo leh ayadoo la adeegsanaayo maaskaro. Ilmaha iyo kurayda waawayn, cirbadda IV ayaa lagula xiraa meesha lagu hayo. Khatarta suuxdinta waa walaac guud oo ay waalidiintu qabaan, laakiin waa mid aad amaan u ah kadib dhawr bilood marka uu gaaro ilmaha sidiisa kale u caafimaad qabay marka lagu siiyo isbitaalka ilmaha.

Si guud, qaliinka halka gees ee hernia ayaa qaadanaaya hal saac. Waxaa lagu sameeyaa qaab bukaan socod ah (ilmaha la keeno kadibna guriga lagu cesho isla maalinta asagoo aan habayn la seexin isbitaalka). Meesha la jeexo (la jaro) waa ku dhawaad hal inji dheerar ahaan lagana sameeyo gumaarka (hoosta laynka suunka) ayadoo lagu tollo tolmo baab'aysa maqaarka hoostiisa. Dhakhaatiirta qaliinka qaarkood ayaa doorta inay qaliinka ku sameeyaan qaybta kore ayagoo jeexa salka ubucda.

Natiijooyinka qaliinka ayaa aad u wanaagsan khataraha qaliinkuna waa kuwo aad u hooseeya. Inta badan carruurta ayaa dareema xanuun yar kadib qaliinka. Daawada kabaabyada sida Novocaine ayaa lagu duraa meesha la jeexay si loo yareeyo qaliinka kadib qaliinka. Caadiyan, keliya daawada xanuun baabi'iyaha caadiga ah sida acetaminophen iyo ibuprofen ayaa loo adeegsadaa xakamaynta xanuunka dhawrka maalmood ee ugu horeeya. Bararka qaar ee gumaarka iyo qooraha ayaa caadi ah. Bararka ayaa caadiyan baaba'aaya iskiis muddo asbuuc ama labo asbuuc ah kadib.

**[H3]Daryeelka Kadib Qaliinka[/H3]**

Kadib qaliinka hernia/hydrocele, caashad khafiif ah, oo sida sharootada ah oo la yiraahdo dermabond ayaa la saaraa meesha la qallo. Nadiifi oo qalaji aaga sida ugu macquulsan, adoo si joogto ah u badelaaya xafaayada. Haddii saxaro gaarto meesha la qalay, ku nadiifi intii aad awoodo istiraasho diiran oo qoyan. Faashada dermabond ayadaa si tartiib ah u soo fuqaysa iskeed.

Hoos waxaad ka helaysaa tilmaamaha guud, laakiin waxaa wax badeli kara dhakhtarka qaliinka:

- Lama ogola qubayska baafka muddo shan maalmood ah kadib qaliinka.
- Lama ogola boonbaleyaasha la fuulo ama ku ciyaarinta sanduuqyada ciida muddo afar asbuuc ah.
- Ilmaha waawayn, ee da'da dugsiga gaaray, lama ogola jiimka, ciyaaraha lagdanka, ama qaadinta wax ka culus galaan caano ah muddo afar asbuuc ah. Tan ayaa isbadeli karta ayadoo ku xiran da'da ilmahaaga iyo tilmaanta dhakhtarka.
- Way ku laaban karaan xanaanada maalintii ama dugsiga shan maalmood kadib qaliinka.

## Goorma ayay tahay Inaan Waco Dhakhtarka Ilmahayga?

Wac dhakhtarkaaga isla markaba haddii ilmuhu qabo wax kamid ah kuwa soo socda:

- barar kasii daraaya oo saran qooraha ama gumaarka kadib 2-3 maalmood
- xanuun joogto ah ama cuncun kadib 2-3 maalmood
- dheecaan ama dhiig ka socda meesha la qalay
- matag soconaaya wax ka badan 24 saac
- qandho ka badan 101.5 digrii Ferahayd
- shuban

Last Updated: 11/2024 by Dr. W. DeFoor, Urology